WOMEN'S REFUGEE COMMISSION

# Shifting Sands: Khatarta iyo Kabashada Dhallinyarada Qaxootiga ee joogta Qaahira

*WARBIXINTA TAAGEERAYAASHA BULSHADA*

## Yaynu Nahay?

Guddiga Qaxootiga Dumarka waa urur cilmi baadhis iyo hormarineed oo fadhigiisu yahay New York, Maraykanka. Hadafkanagu waa inaan hormarino oon ilaalino nolasha iyo xuquuqda qaxootiga iyo dumarka, caruurta iyo dadka yaryar ee gudaha ku barakacay. Waxaan u ololaynaa isbadalada sharciyada, siyaasadaha iyo barnaamijyada saamaynaya dadka ay saameeyaan dagaalada iyo carqaladahu.

## Maxaan Qaahira U nimid?

WRC waxay climi baadhis ku samaysay nolasha magaalooyinka waaweyn  iyo qaxootiga sanadkii 2011. Mid ka mid ah farqiga ugu weyn een ogaanay ayaa wuxuu ahaa baahiyaha dhallinyarada iyo sida looga hadli lahaa. Waxaan maalgalin ku helnay inaan si gaar ah u raadino dhallinyarada qaxootiyada ee magaalooyinka waaweyn ku nool. Waxaan Qaahira u nimid ianaan baadhno baahiyaha dhallinyarada ee la xidhiidha fursadahooda waxbarasho iyo nolaleed. Waxaan u isticmaalnay cilmi baadhista inaan qorno warbixin ku saabsan xaalada Qaahiro.  Cilmibaadhistu waxay sidoo kale naga caawin doontaa inaan qorno haggis aduunkoo dhan ah sida loo diyaariyo loona taabagaliyo barnaamij dhaxal gal ah oo laga hirgaliyo magaalooyinka waaweyn.

## Maxaan Samaynay Intaan Booqshada Ku Jirnay?



Dale Buscher oo ka socota Guddiga Qaxootiga Dumarka oo la joogta Shaqaalaha bulsho ee qaxootiga ee PSTIC kuwaasoo ula shaqeeyay caawin ahaan iyo turjumida baadhitaanka . Wiilasha yaryar waa Ciraaqiyiin qaxooti ah .

Waxaan la kulanay qaxaooti kala ah Sudaniyiin Koonfurta Sudan, Ciraaqiyiin, Soomaali, Eratariyaan iyo Oramo. Inta badan waan la hadalnay dhallinyarada si aan wax uga ogaano dareenkooda iyo fikradahooda xal helidda. Waxaan la kulanay 22 qof oon mid mid u waraysanay (14 dumar ah, 9 rag ah) waxaan qabanay doodo sagaal ah oo diiradda lagu saarayo arrimaha oo kooxo kooxo loo fadhiyo tiiba ay tahay 6-8 qof. Waxaan u samaynay kooxo kala duwan dhallinyarada, waalidiinta, hogaamiyayaasha ururada bulshada (CBO) iyo shaqaale cilmi-nafsiyeedyada (23 dumar ah, 30 rag ah). Isku darka tirade guud ee qaxootiga aan la hadalnay wuxuu ahaa 88 (38 dumar ah, 50 rag ah) waxaan sidoo kale waraysiyo ka qaadnay wakiilada 19 urur kuwaasoo dhallinyarada soo barakacday siiya nolol maalmeed ama adeegyada bulshada.

## Macluumaadka

Masar waxay sixiixday Xeerkii 1981 ee la Xiriiray Qaxootiga iyo Nidaamkiisii 1967. Waxay sidoo kale sixiixday Xeerka 1969 ee Urarkii Midnimada Afrika. Maadaama ay Masar sixiixday Xeerarkan, muhaajiriinta lagu khasbay inay qaxaan ee soo gala Masar waxay xaq u leeyihiin inay helaan magangalyo iyo ilaalo si ku meelgaar ah.

Haayadda Qaxootiga Aduunka ee Qaramada Midoobay (UNHCR) waxay samaysaa go’aansiga xaaladda qaxootinimo (RSD), diiwaan galinta qaxootiga iyo inay siiso waraaqo.

Masar waxay sixiixday waxyaalaha qaar ooy ka soo reebtay ogalaanshaheeda oo ka mid ah shuruucda caalamiga ah ee ilaalinaya ama siinaya qaxootiga xaqooda. Sharciyan, waxay u muuqataa in uusan qaxootigu lahayn xaqqa waxbarasho ama inuu shaqeeeyo. Si kastaba ha ahaatee, marka loo eego sida ay qabaan xeerarka gudaha ee Masar, qaxootiga waxaa loo tixgalayaa ajaaniib ahaa, taasoo macnaheedu

yaahay inay run ahaantii xaq u leeyhiin inay shaqeeyaan waxna bartaan. Laakiin, waxaa jira sababo kale oo adkaynaya  in qof qaxooti ah uu helo shaqaalayn iyo inuu iskuul aado. Labada sababood ee ugu muhiimsan arintan waa:

- Waxaa wadanka ka jirta shaqo la'aan sare. Dhallinyarada Masaaridu waxay sidoo kale qabaan dhibaato xagga shaqo helidda ah.
- Qaxootiga qaarkood Carabiga kuma hadli karaan. Waa inaad carabiga ku hadashaa si aad u aaddo iskuul oo aad u hesho tababar xilliyada fasaxyada.

## Maxaan Baranay?

Qaar dhallinyarada qaxootiga ka mid ah ayaa shaqaynaya. Si kastaba ha ahaatee, sida badan shaqadu waa saacado badan, gurigana way ka fog yihiin  mushaarkooduna wuu yar yahay. Mararka qaar, waxaa jirta khatarta ah in maskax ahaan ama galmo ahaan dhib loogu gaysto ooy oogu gaystaan cidda ay u shaqeeyaan. Shaqo waa la heli karaa, laakiin ma ahan mid amni ah ama waxa la qaato dadka kuma filna si ay isaga bixiyaan kharashaadka gurigoooda.



Wiil dhallinyaro qaxooti ah oo baranaya alxamidda, waa tababar caan ku ah shaqada dhaqaalaha aan tooska ahayn, oo ka dhacaya  Xarunta Tababar Fasaxeedka Don Bosco's Vocational Training Center. Sawirka Don Bosco.

Dhallinyaradu ma laha barnaamijyo u gaar ah. Barnaamijyada oo dhan waxay u adeegaan qoaysaska ama shakhsiyaad. Dhallinyaradu waxay jeclaan lahaayeen barnaamijyo ku saabsan baahidooda oo ka caawinaya isku xidhnaanshahooda.

Dhallinyaradu waxay rabaan inay u suurtagasho inay shaqeeyaan ooy isla markaasna iskuul aadaan/tababar fasaxeedyo. Taas hadda ma samayn karaan maadama aysan jirin xiisado habaynkii la bixiyo. Tani waxay run kusii tahay xiisadaha luuqadaha, sababtoo ah haddii aadan Carabi baran, suurtogal ma ahan ina la aado iskuul iyo tababar.

Dhallinyaradu waxay rabtaa tababar fasaxeed, laakiin tayadu aad bay u hoosaysaa tababaraduna ma dheera.

UNHCR iyo ururada aan dowliga ahayni (NGOs ka) waxay taageeraan oo kaliya qaxootiga aadka u taagta daran. Xittaa haddii aad isku duwan kartid shaqo, ama aad raadiso habab aad xal ugu helayso dhibaatooyinkooda, cid taageero siinaysa ma jirto oo ka abaal marinaysa dhalinyarada dhaqdhaqaaqooda.

Warbixin qaybsashadu waa mid lagu wareerayo. Inta badan ma ahan mid cad. Tani waa arin jirta sababtoo ah kooxaha kala duwan ee qaxootiyadu waxay leeyihiin xuquuq kala duwan. Tusaale ahaan, aad bay ugu adag tahay qaxootiga inay ogaadaan cidda loo ogal yahay waxbarasho lacag la'aan ah ama yaa u qalmo tababar fasaxeed. Markaysan warbixntu caddeyn, waxay sababtaa is aamin waa ka dhexdhasho qaxootiga, UNHCR iyo NGOs ka. Waa inay jiraan wada xidhiidh wanaagsan oo u dhaxaysa dadka bixinaya adeegyada iyo bulshooyinka qaxootiga .

## Maxaan Soo Jeedinaynaa?

### UNHCR waa in:

- Ay ku dartaa xalalka wakhtiyada dheer ee ku wajahan ku boorinta dowladda Masaaridda xalal wakhtiyo gaaban kuwaasoo ku saabsan ka taageeridda dhallinyarada waxbarashada iyo nolal maalmeedka iyadoo samaynaysa barnaamijyo gaar ah.

- Ay dib u qiimaysaa cidda hirgalinaysa adeegyada ay awoodaan inay bixiyaan. Heshiisyada iskaashiga waa in lagu daraa ururada ka shaqeeya arrimaha dhallinyarada Masar.

**Adeeg bixiyayaashu waa in:**

- Ay u sameeyaan Internet ama raadiye/kanaal You tube ah qaxootiga. Inkastoo la sameeyay dadaalo lagu hagaajinayo wadaaga warbixinaha, hadana waxaa loo baahan yahay in la badiyo si loo yareeyo is aamin waaga iyo warxumo tashiilka. Tiknoolajiyadda tanoo kale ah waxay sidoo kale ku dhiirin kartaa dhallinyarada inay ka qayb qaataan arimaha bulshada. Fiidyoowyo casharo ah oo ku saabsan barashada luuqad cusub ama xitaa xiisado laga sii daayo raadiyaha habaynkii ayaa waxay gaadhi karaan kuwa shaqeeya iyo kuwa aan meelaha fog fog soo aadi karin.
- Ay ku xidhmaan ooy bah wadaag la noqdaan ururada gudaha NGOs ka ee Masar. Waxa la haysto way xadidan yihiin dhibaatada dhallinyaradana way ka siman yihiin kuwa loo yimid iyo kuwa qaxootiga ahba. Barnaamijyada sida wacyigalinta, tababar bixinta, kooxaha dhalinyarada iyo kooxaha ciyaaraha waxay wax ka tarayaan yaraynta takooridda soo wajahda dhallinyarada qaxootiga .

**Qaxootiga CBO waa in:**

- Ay qaataan xiisado luuqadeed, xiisadaha shaqo isu diyaarinta, xiisadaha dhaqaalaha iyo xiisado Kumbiyuutareed xiliyada habaynkii.
- Ay sameeyaan koox koox isku xidhnaansho inta isku fil ahba dhallinyarada. Dhallinyaradu waxay rabaan howlaha xamaasadda leh soo iyaga ka caawinaya dhisidda barkulano bulsho.
- Ay kulamada ama tababarada ay ku baraan xiisadaha shaqa u diyaarinta. Tan waxaa bari kara dadka bulshada ka midka ah ee shaqooyinka haysta.
- Ay kulamo la yeeshaan qaxootiyada kale CBO ka si ay isu waydaarsadaan warbixinta, midba kan kale wax uga barto, ay isla sheegaan baahiyaha ay ka siman yihiin iyo fursadaha oo uu midba kan kale taageero.

Waxaad ka akhrin kartaa warbixintayada oo dhamaystiran iyo talo soo jeedintayada *Shifting Sands: Khatarta iyo Kabashada Dhalinyarada Qaxootiga ee joogta Qaahira* (Ingiriisi ahaan), http://wrc.ms/PymzJ0.

Fadlan noogu soo sheeg haddii warbixintan ay ahayd mid wax caawisa ciwaanka info@wrcommission.org.

**Mahadnaq**

Waxaan u mahad naqaynaa dayarta barakacayaasha dumar iyo ragba kuwoo ku bixiyay wakhtigooda iyo codkoodaba cilmibaadhistan.

Warbixintan waxaa suurta galisay maalgalinta Waaxda Arimaha Bulshada Gobalka, Qaxootiyada iyo Socdaalka ee Maraykanka.

Women’s Refugee Commission | 122 East 42nd Street | New York, NY 10168-1289
212.551.3115 | info@wrcommission.org | www.womensrefugeecommission.org